Bundesamt für Fremdenwesen und Asyl

BUUGG-YARAHA
KU SAABSAN WAAJIBAADKA IYO XUQUUQAHA DADKA MAGAN-GALYO RAADISKA AH
FADLAN XUSUUSNOOW FIKRADAHA MUHIIMKA AH EE SOO SOCDA:

1. Lashaqee hawl-socod siintaada magan-galyada!

Marwalba uga jawaab si run ah!

Adiga waajib ayay kugu tahay waana adiga maslaxadaada, **in aad u sheegtid kiiskaaga sida ugu dhammaystiran oona ugu runta ah**. Hadalka beenta ah wuxuu dhaawacayaa sumcadaada! Iska indhatir macluumaadka ka ahaada dhinaca ururada tahriibayaasha iyo/ama ka ganacsiga dadka macluumaadkaas oo ku saabsan waxa ay tahay in aad sheegtid inta lagu guda jiro hawl-socod siinta magan-galayadaada. Taladaas oo kale waxay noqon kartaa mid aanw ax faa'iido ah kuu lahayn haddii ay hadaladaadu yihiin kuwo been ah.

- Caddee ayada oo aan aan lahayn wax kasta oo dib u dhac aan loo baahnayn oo ku dhaca codsigaaga loogu talogalay ilaalinta caalamiga ah (halkan loogu qeexo ayada oo kooban Codsiga Magan-galyada). U sheeg ama u bixi si run ah dhammaan arimaha lagama maarmaanka ah ee arinta xiriirka la leh si aad u caddeysid codsigaaga marka lagu weydiisto.
- U keen ama usoo dir dhammaan daliilka looga baahanyahay dhinacaaga sida ugu dhakhsiyaha baddan.
- Noo sheeg haddii aad hore u tagtay waddan kale oo Yurub ah.
- Ha siinin wax macluumaad been ah maamulada. Si run ah u sheeg magacaaga, wax kasta oo magac ah oo aad hore usoo isticmaashay, taariikhda dhallashadaada, gobolada aad hore usoo degtay, codsashooyin hore oo magan-galyo raadis ah sidoo kale xiriiro bulshadeed iyo qoys.
- Haku khiyaamin maamulada waxyaabaha ku saabsan jinsiyadaada iyo/ama waddanka aad asal ahaan u dhallatay, ama sax ahaanta dukumeentiyadaada (sida dukumeentiyada safarka, tikidhada tareenka). Midaan waxay ku yeelan kartaa saameyn aan wanaagsan qiimeyntaada lagu sameeyo codsigaaga magan-galyada kadibna codsigaaga waxaa dhici karta in si dhakhso ah loo diido.

- U sheeg si run ah sababaha aad u raadinaysid magan-galyada iyo dhacdooyinka lagaa weydiiyo in aad sheegtid dhinaca maamulada.
- Haddii aad heshid wicid waraysi (su'aal weydiin), u tag wakhtiga lagaaga baahanyahay meesha laguu sheegay in aad tagtid. Haddii aad heshid wicid baaritaan (sida dhinaca dhakhtar caafimaad ama khabiir rasmi ah), u tag wakhtiga lagaaga baahanyahay meesha laguu sheegay in aad tagtid. Lashaqee baaritaankaaga iyo baarista. Fadlan nagu caawi inta lagu guda jiro ballamahaan tooska wada shaqayntaada.
- Haddii aad xanuunsantahay oona imaan karin ballanta, fadlan ugu sheeg si dhakhso ah maamulada kadibna keen warqada dhakhtarka si aad midaasi u xaqiijisid. Haddii ay jirto sabab kale oo caddeynaysa sababta aad uga soo bixi weysay ballanta, fadlan u sheeg maamulada.
- Hadddii aad ku guuldaraysatid, aadan ka cudur daaranin, in aad raacdid wicitaanka ah in aad meesha tagtid, maamulada waxaa khasab ku ah in ay u qaataan in aad doonaysid in aad ka dhuumatid hawl-socod siinta. Hawl-socod siintaada magan-galyada waxaa dhici karta in la joojiyo, ama natiijo ka dhallata go'aan aan wanaagsanayn, ama amar xirid ah ayaa laguu soo saari doonaa.
- Lashaqee inta lagu guda jiro hawlaha xadidaada ama go'aaminta aqoonsashada ee booliiska (tusaale ahaan. fara qaadista, sawirada iwm.).
- Dhammaan iyo wax kasta oo isbedelo ah oo ku dhaca cinwaankaaga aad adeega ku qaadatid, waxaa loola jeedaa. cinwaanka boosta midkaas oo aynu kuugu soo dirayno waraaqaha, waa in si dhakhso ah loogu sheego maamulada. Midaan sidoo kale waa mid la dabakhi karo haddii aad joogtid waddanka dibadiisa. Haddii aad joogtid gudaha waddanka Austariya, waxaa kugu filan in aad isaga diiwaangelisid maamulka diiwaangelinta degenaanshaha awooda leh gudaha seddex maalmood. Sidoo kale waa suurtogal in aad magacoowdid qaate oggolaansho haysta (tusaale ahaan. qof qaraabo ah oo degan waddanka Austariya, urur saqado, iwm.).
- Waa aasaasi in ay maamuladu ogyihiin ciwnaanka laguugu soo dirayo waraaqaha. Haddii aadan nagu soo wargelinin isbedelka ku dhacay deegaankaaga, midaan waxay kugu yeelan kartaa cawaaqibta aan wanaagsanayn ee soo socota:
    - Haddii aan laguugu soo diri karin wicitaanada hawl-socod siintaada loogu talogalay magan-galyada waxaa dhici karta in la joojiyo ama in uu ka dhasho go'aan aan wanaagsanayn. Waxaa dhici karta in aad weysid ilaalintaada lagaa ilaaliyo in lagu musaafuriyo ama tarxiilo!

    - Haddii maamulada aanan kuu soo diri karin go'aanka ku saabsan hawl-socod siintaada, waxaad weyn doontaa ballamaha muhiimka ah ee loogu talogalay meelaynta hagaajinada sharciyeed (tusaale ahaan, samaynta fayl rafcaan ah).
    - Kadibna go'aanka ay qaataan maamulada wuxuu noqon karaa mid kama dambays ah oona wakhtigiisa dhacay waxaana ka dhallanaysa in aad weysid ilaalintaada lagaa ilaaliyo musaafurinta ama tarxiilida.
- Haddii aad sheegatid in aad tahay qof yar midaana ay tahay mid laga shakiyay, waxaa khasab kugu ah in aad bixisid caddeyn ku saabsan in aad tahay qof yar adiga oona midaasi ku sameeya tooska shahaadooyin dhallasho lagu kalsoonaan karo ama daliil kale oo munaasab ah. Haddii aadan awoodin in aad sidaasi samaysid, maamulada waxay amar ku bixin karaan in laguugu sameeyo baaritaan caafimaad si loo xadido da'daada dhabta ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xadidaada caafimaadka ee da'da waxaa laga helayaa buugg-yaraha arintaasi loogu talogalay.
- Haddii aad tahay qof da' yar oo aan cidna lasoconin, waxaa laga wadaa. haddii aad ka yartahay da'da 14 sanno, maamuladu waajib kuma ahan in ay bilaabaan ama sameeyaan raadis qoys. Waxaad soo diri kartaa ama keeni kartaa codsi aad ku codsanaysid bilaabida ama sameynta raadis qoys. Maamuladu waxay kugu caawin doonaan raadinta qoyska. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan raadiska qoyska dadka da'da yar waxaa laga helayaa buugg-yaraha arintaasi loogu talogalay.
- Haddii aad tahay qof yar oo aan cidna lasoconin, waxaa laga wadaa. haddii aad ka weyntahay da'da 14 sanno, maamulada waxaa waajib ku ah in ay bilaabaan ama sameeyaan raadis qoys. Waxaa khasab kugu ah in aad lashaqaysid raadinta qoyska oona bixisid dhammaan daliilka xaqiijinaya xiriirkaaga qoyska. Sidoo kale adiga waxaa waajib kugu ah in aad si dhakhso ah ugu gaysid dhammaan natiijooyinka wax kasta oo raadiska qoyska ah dhinaca Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA). Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan raadiska qoyska ee dadka da'da yar waxaa laga helayaa buugg-yaraha arintaasi loogu talogalay.
- Haddii aad ugu **diiwaangashantahay** xarunta xiriirka **sida guri la'aan** adiga waxaad si ootamaatik ah ugu hoggaansantahay **waajibka soo sheegida**. Waxaa khasab kugu ah in aad usoo sheegtid 14 maalmood kasta saldhiga booliiska u dhow xarunta xiriirka. Waajibkan soo sheegida ah wuxuu bilaabanayaa maalinta koowaad ee shaqada laga bilaabo taariikhda diiwaangelinta aad isku diiwaangelisid sida guri la'aan. Shardigan ma ahan mid ku khuseeya intiiba aad ku jirtid nidaamka hawsha la oggolaaday.

Haddii aad ku xad-gudubtid waajibaadkaaga ah in aad noola shaqaysid sida ahaanshahaaga qof magan-galyo raadis ah, midaan waxay si aan wanaagsanayn u saameyn kartaa qiimeynta lagu sameeyo codsigaaga magan-galyada iyo sumcadaada! Fiiri waajibaadka si aad noola shaqaysid una soo sheegtid. Haddii aadan midaan samaynin, waxaa lagu gelin karaa xabsi mudo gaaban ah midaas oo keenaysa musaafurin ama tarxiilid lagaaga sameeyo dhinaca Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA) si loo hubsado arinta waajibka ah ee hawl-socod siinta ee loogu talogalay gudbinta go'aanka joojinta degenaanshahaaga, ama eryinta. Adiga sidoo kale waxaad u hoggaansantahay cawaaqib kale oo ah sida joojin ama xannibaad lagu sameeyo daryeelkaaga aasaasiga ah iyo adeegaha dheefaha, ama waxyaabo aan ficnayn oo nidaamka hawsha ah ayaa soo bixi kara.

2. HAWL-SOCOD SIINTA MAGAN-GALYADA:

a) Shuruudaha loogu talogalay ku bixinta magan-galyada gudaha Austariya:

Adiga waxaad xaraysay codsi magan-galyo ah. Hawl-socod siinta magan-galyadaada waa la **oggolaaday**. Waxaad si daacadnimo ah u muujinaysaa in aad haysatid aasaas macquul ah oo ku saabsan in ka cabsatid in laguugu cadaadiyo waddankaaga aad u dhallatay, cadaadiskaas oo sabab u ah jinsigaaga, diintaada, dhallashadaada, fikradahaaga siyaasadeed ama in aad xubin ka noqotid koox bulshadeed gaar ah. Ma awoodid in aad miciin bidid ilaalinta waddankaaga aad u dhallatay ama waad ka cabsanaysaa in aad sidaasi samaysid.

b) Waraysiga:

- Marka la aqbalo hawl-socod siinta magan-galyadaada (sida horeba loogu sharxay buugg-yaraha Macluumaadka Biloowga ah), waxaa waraysi kula yeelan doona xubin ka tirsan shaqaalaha Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA). Xubinkaan shaqaalaha ka tirsan waa mid og duruufaha ka jira waddankaaga aad u dhallatay wuxuuna go'aaminayaa codsigaaga magan-galyada.
- Waxaa khasab kugu ah in aad caddeysid codsigaaga magan-galyada inta lagu guda jiro waraysigan. Fadlan sharaxaad ka bixi sababaha aad uga cabsatid cadaadiska. Sidoo kale sheeg xaqiiqooyin iyo duruufo kale oo kuu diidaya in aad dib ugu noqotid waddankaaga aad u dhallatay.
- Dhammaan macluumaadka aad bixisid ee ku saabsan waddadii aad kusoo carartay iyo sababta aad usoo carartay waxay ahaanayaan kuwo sir ah loomana gudbinayo maamulada ka jira waddanka aad u dhallatay.
- Waa muhiim in aad u sheegtid si buuxda, oo faah-faahsan oona la fahmi karo dacwada sheekadaada shakhsiyeed iyo khatarada gaarka ah ee aad la kulmaysid. Iska hubso si kastaba in aad runta sheegtid!

Wax kasta oo been ah oo ku jira hadalkaaga waxay dhaawacaysaa sumcadaada. Haddii ay jiraan wax mugdi ah oo lagu wareero oo ku jira hadalkaaga, waxaa lagu weydiin doonaa su'aalooyin dheeraad ah.

- Waraysigu waa qaybta ugu muhiimsan ee hawl-socod siinta magan-galyadaada. Wuxuu qaabaynayaa aasaaska lagu dhisayo go'aanka ay gaaraan maamulada midkaas oo ku saabsan haddii lagu siinayo magan-galyo iyo haddii aan lagu siinaynin.
- Waraysiga sidoo kale waxaa imaan kara qof aad ku kalsoontahay, qareenkaaga iyo/ama wakiilkaaga, ama lataliye sharciyeed.
- Haddii aad tahay qof ka yar da'da 18 sanno, wakiilkaaga sharciyeed (waalid, lataliye sharciyeed ama xafiiska nolol wanaaga dhallinyarada ee u qalma) ayay khasab tahay in ay joogaan meesha waraysigaaga.
- Haddii cabsidaada cadaadiska la oggaado in ay faragelinayso xadidaadaada-shakhsiyeed ee galmada, waxaad xaq u leedahay in uu waraysi kula yeesho qof aad isku nooc tihiin. Haddii si kasta oo ay tahay jeceshahay in uu waraysi kula yeesho qof aad isku nooc tihiin midaas oo ay sabab u tahay arimo la xiriira cararida aad kasoo carartay waddankaaga, fadlan noogu soo sheeg wakhti hore.

c) Turjubaanada:

Maamulada waxay kuu diyaarinayaan turjubaano bilaash ah oo aadan lacag ku bixinaynin si aad ugu sheegtid sababta aad uga soo carartay waddankaaga adiga oo aan la kulmin wax dhibaato luuqada xageeda ah. Haddii sababo la xiriira kasoo cararida aad kasoo carartay waddankaaga aad jeceshahay in uu kuu turjumo qof aad isku nooc tihiin, fadlan noogu soo sheeg wakhti hore. Maamulada waxay isku dayi doonaan intiiba ay awoodaan in ay kuu keenaan turjubaan aad isku nooc tihiin. Hawsha turjubaankan waa mid kaliya ku eg in uu u turjumo hadalkaaga sida ugu saxan ee ugu suurtogalka ah. Ayagu kaliya waxay u shaqeeyaan dhex-dhexaadiyayaal luuqad oo u dhaxeeya adiga iyo maamulada iyo, sida shaqaalaha u shaqeeya maamulada, waxay ku xiranyihiin qaanuun adag oo sir ahaansho iyo ixtiraamid hadalkaaga ah.

Haddii aad dhib ku qabtid fahanka turjubaanka ama haddii aad ka cabsatid in aad si fur-furan u hadashid asaga ama ayada oo meesha jooga, haddaba fadlan si dhakhso ah ugu sheeg shaqaalaheena.

Fadlan xusuusnoow in turjubaanku uusan awoodin kuna siin karin macluumaad sharciyeed wax kasta oo ay ahaadaan oo ku saabsan hawl-socod siinta magan-galyadaada.

d) Diiwaano qoran:

Hadalkaaga waa la qorayaa inta lagu guda jiro waraysiga, waxaa laga wadaa waraaq ayaa loo guurinayaa. Dhammaadka waraysiga, qoraalkan waxaa dib kuugu turjumaya turjubaanka adiga maslaxadaada darteeda. Midaan waxay kuu oggolaanaysaa in aad ku samaysid wax

kasta oo sixitaan ama ku darid ah. Haddii hadalkaagu uu ahaa mid sax ah oona loo tebiyay si buuxda, ku xaqiiji midaasi adiga oo qoraalka sixiixa. Waxaad codsan kartaa nuqul ku saabsan qoraalkan dhammaadka waraysiga.

e) Go'aan qaadashada:

Go'aanka maamulada ee ku saabsan natiijada hawl-socod siinta magan-galyadaada waxaa loo soo saarayaa asaga oo ah qaabka go'aan qoran. Shayga ugu muhiimsan ee go'aankan waxaa loo turjumayaa luuqad aad fahmi kartid.
Waxaa dhici karta in go'aanka adiga gacanta lagaaga saaro dhinaca maamulada ama laguugu soo diro boostada ama ka qaadatid dhinaca booliiska. Sidaas darteeda fadlan markale waa in aad ugu sheegtid si dhakhso ah maamulada wax kasta oo isbedel ah oo ku dhaca cinwaanka. Adiga waxaad xaq u leedahay in go'aanka Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA) ku samaysid muraajaco ama dib-u eegis midaas oo loo sameynayo in rafcaan loogu diro dhinaca Maxkamada Maamulka Federaalka. Rafcaankaas oo kale kaliya waxaa la xarayn karaa muddo khaas ah waxaana kaliya laga xarayn karaa dhinaca Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA). Sidaas darteeda u akhri si taxadar leh tilmaamaha ku qoran dusha nidaamka rafcaanka lagu sheegay go'aankaaga (kuwaan waa tilmaamaha kuu sheegaya nooca tallaabada aad qaadi kartid ee lidka ku ah go'aanka iyo muddada aad kusamayn kartid arintaasi).

f) Keenida dukumeentiyada

- Haddii aad joogtid ama ku jirtid Xarunta Soo dhoweynta Biloowga ah ama laguugu meeleeyay meel samafal, dukumeentiyadaada meesha ayaa laguugu keeni doonaa. Haddii aad magacoowday wakiil sharciyeed (qareen) ama qof loo oggolaaday in uu qaato waraaqahaaga, dukumeentiyada ka ahaada dhinaca maamulada ayaga ayaa loo gayn doonaa. Inta lagu guda jiro oggolaanshaha hawl-socod siinta, wicitaanada adiga ayaa si khaas ah laguugu soo dirayaa.
- Haddii aad tahay qof ay da'diisu ka yartahay 18 sanno oona aadan la soconin waalidiintaada, waraaqaha ka ahaada dhinaca maamulada waxaa loo dirayaa ama loo keenayaa wakiilkaaga sharciyeed (lataliyaha sharciyeed ee ku jira oggolaanshaha hawl-socod siinta ama xafiiska nolol wanaaga dhallinyarada). Sidaas darteeda waa in aad xiriir la ahaatid xafiiska nolol wanaaga dhallinyarada ee ku yaala meesha aad degantahay tooska kiiskaaga una sheeg meesha aad joogtid.
- Haddii ay dhacdo in aad ka fogtahay cinwaanka aad sheegtay, dukumeentiga adiga laguugu talogalay waxaa loo dhiibayaa warqad keenaha (caadi ahaan xafiiska boostada) halkaas oo aad hadhow kasoo qaadan kartid. Fadlan xusuusnoow in dhiibista dukumeentiyada ay lamid tahay keenida dukumeentiga loo keeno si shakhsi ah oona sidaasi ku bilaabmayso tirinta wax kasta oo wakhti xadidan ah!

- Haddii la diido in la aqbalo dukumeentiga ayada oo aan jirin wax asal sharciyeed ah, waxaa looga tegi doonaa cinwaanka khuseeya ama waa lasoo dhiibi (caadi ahaan waxaa looga tegayaa xafiiska boostada). Fadlan xusuusnoow in dukumeentiga loo tixgelinayo in laguu soo diray oona sidaasi ku bilaambayso tirinta wakhtiga xadidan.
- Haddii aadan siinin maamulada cinwaan hadda ah oo wax laguugu soo diro oona maamulada aanan ku heli karin si fudud cinwaankaaga, go'aanka khuseeya hawl-socod siintaada waxaa sidoo kale loo dhiibayaa maamulada. Dhiibistaan sidoo kale waxaa loo tixgelinayaa in ay tahay keenid shakhsiyeed waxaana bilaabanaya ballamaha muhiimka ahi in ay meeshaan ka bilaabmaan.

  Sidaas darteeda, marwalba usoo sheeg maamulada wax kasta oo isbedel ah oo ku dhaca cinwaanka.
- Haddii tusaale ahaan aadan hadda haysanin deegaan muddo-dheer ah, waxaad magacaabi kartaa qof qaata oo la oggolaaday midkaas oo loo geeyo dukumeentiyada (tusaale ahaan, qof qaraabo ah oo ku nool gudaha Austariya, ururo sadaqo, iwm.). Fadlan ugu sheeg cinwaankan sida ugu dhakhsiyaha baddan maamulada. Kadib dhammaan dukumeentiyada xiriirka la leh dacwadaada waxaa lagu diri doonaa halkaasi.
- Xarunta xiriirka ee loogu talogalay dadka guri la'aanta ah (meeshaan waa xarun ku taala degmada aad ku nooshahay meeshaas oo ay inta baddan yimaadaan dadka aan guri haysanin) looma tixgelinayo in ay tahay cinwaan wax lagu diro inta lagu guda jiro hawl-socod siinta magan-galyada. Midaana macnaheedu waxay tahay in aanan wax dukumeenti ahi loo diri doonin halkaasi inta lagu guda jiro hawl-socod siinta magan-galyada.

g) Ku xiga Hawl-socod siinta codsiga

Haddii aad haraysay codsi ku xiga (waxaa laga wadaa codsi dheeraad ah kadib codsiga hore midkaas oo go'aan sharciyeed xajinaya lagu sameeyay), shuruudo gaar ah ayaa khusaysa hawl-socod siintaada. Buugg-yaraha arintaasi loogu talogalay ayay ku qorantahay dhammaan waxyaabaha xiriirka la leh ee faah-faahsan.

h) Ka bixida ama ka noqoshada codsiga magan-galyada:

Mabd'a ahaan, adigu kama bixi kartid codsigaaga magan-galyada.
Haddii si kasta oo ay tahay aad weli doonaysid in aad dhammaysid hawl-socod siinta magan-galyadaada, fadlan ugu wargeli si qoraal ah maamulada ama la xiriir xarunta latalinta dib-u noqoshada ama lataliyaha sharciyeed.
Haddii aad jeceshahay in aad ka baxdid codsigaaga magan-galyada kadib marka rafcaan loogu sameeyo go'aan lid ku ah midkaas oo loo gudbiyo Xafiiska Socdaalka iyo Magan-

galyada ee Federaalka (BFA), midaan waxaa loo tixgelinayaa in ay tahay ka bixid aad ka baxdid rafcaankaaga. Adigu ma awoodid in aad ka hortimaadid go'aanka asalka ah ee Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA) tooska hagaajinta sharciyeed ee caadiga ah.

i) Amarka suurtogalka ah ee xiristaada

Maamulada waxay soo saari karaan amar loogu talogalay xiristaada haddii:

- ka dhuumatid hawsha; taasna waxay tahay, haddii maamulada aanan garanaynin halka aad joogtid.
- aadan imaanin ballanta taariikhda lagaaga sheegay dhinaca maamulada inkastoo lagaa codsaday in aad sidaasi samaysid.

Marka lagu xiro, waxaa lagu hor keenayaa maamulada waxaana ku keenayaa maamulada ammaanka.

j) Hawl-socod siinta magan-galyada qoyska:

Maadaama aad tahay xubin qoys katirsan oo ajnabi ah midkaas oo hore loo siiyay magan-galyo ama xaalad ilaalin dheeraad ah, kaliya waxaa lagu siinayaa isla heerka ilaalinta haddii laga soo baxo shuruudaha soo socda:

- xubinkaaga qoyska ma ahan in uu noqdo dembiile
- in aad lasii noolaatid xubnaha qoyskaaga ma ahan mid suurtogal kuu ah waddan kasta oo kale
- aan jirin hawl-socod siin khuseysa burinta ilaalintaada dheeraadka ama magan-galyada ah midaas oo ay suurtogal tahay in ay joojiso xubinka qoyskaaga
- ma noqon kartid muwaadhin EEA ama Swiss
- xubinka qoyskaaga midkaas oo codsiga aad sheegaysid lagu siinin magan-galyo iyo/ama xaalada ilaalinta dheeraadka ah ee ah hawl-socod siinta magan-galyada qoyska; haddii si kasta oo ay tahay xubinkaasi qoyska uu yahay qof yar oo aan guursanin, xadeyntaan adiga kuma khuseyso.

Xubnaha qoyska waxaa loo tixgelinayaa in ay yihiin tusaale ahaan: xaas/nin, waalid haysta ilmo yar iyo carruur yar-yar oo aan guursanin. Xaaska/ninka waxaa khasab ku ah tusaale ahaan in ay hore iskula noolaayeen qoys guud oo waddanka ay u dhasheen ah.

Carruurta:

Codsiga aad soo xaraysay sidoo kale wuxuu ku saabsanyahay ilmahaaga yar, carruurtaada yar-yar oo aan guursanin (ka yar da'da 18) haddii ay kula socdaan. Haddii uu ilmo ku dhasho waddanka Austariya waxaa waajib kugu ah in aad midaan usoo sheegtid dhinaca Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA) inta lagu guda jiro hawl-socod siinta

magan-galyada joogtada ah. Midaan sidoo kale waxay khuseysaa marka aad sii joogtid waddanka Austariya kadib marka aad heshid go'aan buuxa oo aan wanaagsanayn midkaas oo aan ahayn degenaansho sax ah ama dib u dhugid ka saarida adiga ku khuseysa. Markaasi codsiga loogu talogalay ilaalinta caalamiga ah waxaa loo tixgelinayaa mid isku mar la xareeyo.
Haddii lagu siiyay magan-galyo ama xaalad ilaalin dheeraad ah, waxaad u keeni kartaa si toos ah ama ugu soo diri kartaa codsi ku saabsan ilmaha ku dhashay waddanka Austariya midkaas oo ah qoraal meesha Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA).

k) Kaarka xaq u yeelashada degenaanshaha:

Haddii hawl-socod siinta magan-galyadaada la oggolaado waxaa laguu soo saari doonaa kaarka xaq u yeelashada degenaanshaha. Shaqaynta kaarkan waxay ku dhammaanaysaa go'aanka u dambeeya ama joojinta hawl-socod siinta magan-galyadaada. Halkan marka ay tahay waxaa khasab kugu noqonaya in aad dib ugu soo celisid kaarka dhinaca Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA).

l) Xaq u yeelashada kaarka ilaalinta dheeraadka ah:

- **Magan-galyada:**

Haddii lagu siiyay magan-galyada, Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA) kadib wuxuu soo saarayaa Xaq u yeelashada kaarka magan-galyada. Midaan kaliya waxay khuseysaa marka lasoo diro ama la keeno codsigaaga marka ay tahay Nofembar 15, 2015 ama kadib. Kaarkan wuxuu u shaqeeyaa in uu caddeeyo aqoonsiga shakhsiyadaada iyo sharciyeynta degenaashahaaga gudaha Austariya. Wuxuu dhacayaa marka xaaladahaaga ku saabsan xaq u yeelashada magan-galyada ay noqdaan kuwo aan waxba ahayn ama wax kama jiraan ah.

- **Ilaalinta dheeraadka ah:**

Haddii uu maamulku xaqiijiyo in aadan xaq u lahayn in lagu siiyo magan-galyo, laakiin haddana si kastaba aanan lagu musaafurin ama tarxiili karin ama lagu eryi karin arin sabab u ah xaalada aad ku leedahay waddanka aad u dhallatay (khatar ah in lagu xad-gudbo xaqa aad u leedahay nolosha, ama in lagu xad-gudbo ciqaabta dilka ee mamnuuca ah, jirdilid ama in laguula dhaqmo si aan banii'aadanimo ahayn ama bahdilaad), kadibna waxaa lagu siin doonaa oggolaansho degenaansho kumeel-gaar ah. Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA) kadib wuxuu kuu soo saari doonaa kaar ilaalin dheeraad ah.
Kaarkan wuxuu u shaqeeyaa in uu caddeeyo aqoonsiga shakhsiyadaada iyo sharciyeynta degenaashahaaga gudaha Austariya. Xaqa aad u leedahay degenaansho wuxuu ahaanayaa mid shaqeeya illaa laga gaaro go'aanka u dambeeya ee dheereynta la bixiyay ee codsiga la xareeyay kahor inta uusan dhicin xaqa aad u leedahay degenaanshaha.
Haddii sababaha asalka ah ee lidka ku ah eryida ama musaafurinta ama tarxiilida laguu tarxiilo waddankaaga aad u dhallatay aanan la dabakhi karin, xaqa kumeel-gaar ah ee

degenaanshaha waa la burin doonaa kadibna kaarka ilaalinta dheeraadka ah wuxuu noqon doonaa mid dhaca.
Go'aanka waxaa lagu samaynayaa qaab qoraal ah. Adiga waxaad xaq u leedahay in go'aanka Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka (BFA) ku samaysid muraajaco ama dib-u eegis midaas oo loo sameynayo in rafcaan loogu diro dhinaca Maxkamada Maamulka Federaalka. Kaarka waa in dib loogu soo celiyo dhinaca maamulada kadib go'aanka kama dambaysta ah oona wakhtigiisa dhacay.

m) Latalin:

Lataliye sharciyeed madax banaan ayaa lagu helayaa si bilaash ah inta lagu guda jiro hawl-socod siintaada. Gargaarka gudaha ama ururada sadaqada (Caritas, Evangelisches Hilfswerk, Diözese, iyo kuwo kale) ayaa sidoo kale kugu caawin kara si bilaash ah kuguna matalaya inta lagu guda jiro hawl-socod siinta magan-galyadaada.
Dabcan sidoo kale waxaad magacaabi kartaa wakiilkaaga sharciyeed ee khaaska ah (qareenka) midkaas oo lacagta ku baxda aad bixinaysid.

3. CIQAABTA:

Fadlan xusuusnoow in tallaabadaha soo socda, ayaga oo ay kuwo kalena jiraan, waxaa khasab ku ah dacwad-qaadis:

- Haddii aad siisid maamulada macluumaad been ah oo ku saabsan aqoonsigaaga shakhsiyeed ama asalkaaga dhallasho ee ku saabsan hawl-socod siinta magan-galyadaada, inkastoo aad ogtahay in macluumaadkan uu yahay mid aanan run ahayn, nafsadaada waxaad gelinaysaa dacwad-oogis.
- Haddii aad jebisid waajibkaaga ah in aad soo sheegtid inta lagu guda jiro hawl-socod siinta magan-galyadaada, nafsadaada waxaad gelinaysaa dacwad-oogis.
- Haddii aad jebisid xannibaadaha deegaankaaga inta lagu guda jiro oggolaanshahaaga hawl-socod siinta, nafsadaada waxaad gelinaysaa dacwad-oogis.